

REPUBLIC OF



SOMALILAND

**THE PRESIDENT**

REF.....JSL/M/XERM/249-1260/082012

DATE.....12/08/12.....

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0255/082012**

**Dhaqan-galka Waxka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada  
Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001  
lifaaqa shanaad**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/G/KF-Q11/563/2012 ee 11/08/2012 ee Go'aanka Ansixinta Waxka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 lifaaqa shanaad;

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Waxka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 lifaaqa shanaad.

Allaa Mahad Leh,

**President**

**Axmed Maxamed Siifanyo**  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

RL:88  
**RECEIVED**  
14/08/2012



Ref: CW/G/KF-Q11/563/2012

Date: 11/08/2012

Ujeedo:- Go'aanka Ansixinta Waxka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada  
Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka (XeerLr 20/2001) Lifaaqa 5aad

### GOLAHA WAKIILADA JSL

MARKUU ARKAY: Qodobka 4aad, Faq(1). 8aad, faq (1aad) 9aad faq(1) 22aad faq(2aad) iyo 111aad ee dastuurka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

MARKUU ARKAY: Digreeto No: JSL/M/SHGW/081-1244/062012 ee 04/08/2012 kuna saabsanayd Xeer Lr 20/2001, Waxkabelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka lifaaqiisa 5aad .

MARKUU ARKAY: Go'aanka ansixinta iyo Wax kabelka Xeerka Doorashooyinka lifaaqiisa 5aad Ee Golaha Guurtida kuna taariikhaysan 11/08/2012 eeg lifaaqa

MARKUU ARKAY: In Golaha Guurtidu wax ka bedel iyokaabis ku samaynin waxkabelkii iyo kaabistii xeerka Waxkabelka iyo kaabista doorashooyinka lifaaqiisa 5aad xeer Lr. 20/2001 kuna ansixiyeen sidii Golaha Wakiiladu ugu gudbiyeen

### WUXUU

Golaha wakiilada JSL halkan ugu soo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland Wax-Kabelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Xeer Lr. 20/2001 lifaaqiisa 5aad, si uu uga guto waajibaadkiisa dastuuriga ah.

ALLAA MAHADLEH

C/risaaq Siciid Ayaanle.

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)

Xog.Guud ee G/Wakiilada JSL

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

**JAMHUURIYADDA  
SOMALILAND  
GOLAHA WAKIILADA**



**Wax-ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada**

**Madaxtooyada iyo Golayaasha Deeganka (XeerLr 20/2001)  
lifaaqa Shanaad**

**XEER NO - 20/2001**



**WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABISTA LIFAAQA U AH**  
**XEERKA DOORASHADA MADAXTOOYADA IYO GOLEYAASHA DEEGAANKA**  
**(XEER Lr. 20/2001)**  
**LIFAAQA 5AAD**

*Wax-ka-beddelka iyo/ama Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanku waxa uu saamayn ku yeelanayaa Qodobka 7aad, Faqraddiisa 1aad ee Lifaaqa 3aad ee Xeerka, Qodobka 9aad ee Xeer Lr. 20/2001 iyo Qodobbada 22aad iyo 24aad ee Lifaaqa 4aad ee Xeerka.*

**Qodobka 7aad**  
**Shaqaalaha Dawladda iyo Hay'adaha Dawliga ah**

Qodobka 7aad ee Lifaaqa 2aad ee Xeerka oo waajibnaaya in Muddada uu Shaqada ka tagaayo qofka Shaqaalaha Dawladda ah ee isu sharraxaaya Doorashooyinka Deegaanka iyo Madaxtooyadu ay tahay **“Lixdan (60) maalmood ka hor taariikhda qabashada doorashada”** 2waa la beddelay, waxaana loo beddelay:

**“Sagaashan (90) maalmood ka hor taariikhda qabashada doorashada”**

**Qodobka 9aad**  
**Goobaha Codbixinta**

Qodobka 9aad ee Xeer Lr. 20/2001 waxaa lagu kordhiyay Faqrad 4aad, 5aad iyo 6aad oo u dhigan sidan hoos ku xusan:

- 3) Haddii degaano dalka ka mid ah ay la soo gudboonaato durufo culus ama xaalado aan saamaxayn in doorasho ka qabsoonto, waxaa soo qiimaynaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyagoo kala tashanaaya Xukuumadda iyo Xisbiyada/Ururrada Siyaasadda;
- 4) Goobaha codbixinta ee ay doorashadu ka qabsoomi waydo, tirada kuraasida loo qoondeeyay goobahaas waxay Xisbiyadu/Ururradu u kala qaadanayaan saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee Degmada;

- 5) Haddiise ay doorashadu ka qabsoomi waydo Degmo dhan, waxa ay Axsaabtu/Ururradu kuraasida degmadaas u kala qaadanayaan saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee Gobolka. Waxaana loo raacayaa sida magacyadoodu ay liiska ugu kala horreeyaan.



**Qodobka 22aad**  
**Habka Doorashada**

Waxaa la beddelay Qodobka 22aad ee Lifaaqa 4aad ee Xeerka oo dhigaaya:

*“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo doorashada Goleyaasha Deegaan, waa in uu Komishanka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in Komishanku siiyaa murashax kasta astaan u gaar ah”*

Waxaana loo beddelay:

*“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo doorashada Goleyaasha Deegaanka, waa in uu Komishanka Doorashooyinka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku sar-go’an tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah oo ku salaysan Habka Liistada Furan (Open List Sytem). Waxa Komishanka Doorashooyinka Qaranku uu siin doonaa murashax kasta Lambar u gaar ah oo u noqon doona summad”.*

**Qodobka 24aad**  
**Astaamaha Liistooyinka Murashaxiinta**

Waxaa la beddelay Qodobka 24aad, Faqraddiisa 1aad, 2aad iyo 3aad ee Lifaaqa 4aad ee Xeerka oo dhigaaya:

1. Astaamaha liisaska murashaxiinta ee ururada/xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka la soo bandhigayo.
2. Xisbi/ururna waa in aanu isticmaalin astaan uu xisbi/urur kale hore ugu isticmaalay doorasho hore.
3. Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga, hase yeeshee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama dariiqo




Waxaa lagu beddelay:

**“Lambarrada murashaxiinta ee Ururrada/Xisbiyadu waa in ay kala duwanaadaan marka lasoo bandhigaayo, iyadoo la raacaayo habka uu Komishanku usoo dhigay”.**

**Qodobka 66aad**  
**Adeegsiga iyo Dhaqan-galka Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeerka**  
**Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001**  
**iyo Lifaayadiisa**

Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 iyo Lifaayadiisa 3aad iyo 4aad waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Sharci Dejintu ansixiyaan ee uu Madaxweynuhu saxeeexo.

C/risaaq Siciid Ayaanle  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada



C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)  
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL